Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Dowlad Gobaleedka Galmudug
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفدرالية
لمجلس التشريعي لولاية جلمدج
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
Galmudug State of Parliament
Office of the Speaker

**Tix:** XGBGM/0038/21 **Tar:** 31 August 2021

**Ku: Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug = Dhusamareb=**
**Og: Madaxweyne Kuxigeenka Dawlad Gobaleedka Galmudug = Dhusamareb=**
**Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare ee Dawlad Gobaleedka Galmudug = Dhusamareeb=**

**Ujeedo: Soo Gudbin Shuruuc uu Ansixiyey Golaha Sharci-dejinta DGGMMudane Madaxweyne,**

Iyada oo la tixraacayo warqadaadii sumadeedu aheyd Tix:DGG/XMKG/D0091/6/21 kuna taariikhaysneed 09/06/2021 kana timid Madaxweyne Kuxigeenka DGGM u jeed-keeduna ahaa soo gudbin Hindise Sharciyeedyo ka yimid Golaha Wasiirada si Baarlamaanku uga guto Waajibkiisa Dastuuriga ah.

Golaha Sharci-dejinta DGGM ayaa ku Ansixiyey Kalfadhigiisa 2aad ee Sanadkaan 2021, Fadhiyadiisii 19, 20, 23, 25, 26 iyo 27, Shuruucda kala ah;

1. Sharciga Kalluumeysiga Dawlad Gobaleedka Galmudug Sharci LR:005. 30 June 2021.
2. Sharciga Nidaaminta & Naqshadeynta Magaalooyinka Galmudug Sharci LR:006. 04 July 2021.
3. Sharciga Dakhliga Dawlad Gobaleedka Galmudug Sharci LR:007. 07 July 2021.
4. Sharciga Khidmadaha & Ujuurooyinka Kalluumeysiga Badda Galmudug Sharci LR:008. 11 July 2021.
5. Sharciga Shirkadaha Ganacsiga Dawlad Gobaleedka Galmudug LR:009. 12 July 2021.
6. Sarciga Nootayada Dawlad Gobaleedka Galmudug LR:010. 14 July 2021.

Mudane Madaxweyne adiga oo gudanaya Waajibkaaga Dastuuriga ah waxaan kusoo gudbinaynaa 6 daan Sharci ee kor ku xusan si aad ugu meel-mariso Xeer Madaxweyne, kadibna loogu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

M.ne Dr. Maxamed Nur Gacal
Guddoomiyaha
Baarlamaanka DGGM

JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DAWLAD GOBOLEEDKA SOMALIYEED EE GALMUDUG
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**SHARCI Lr: 0010** **Tr: 26/2/2022**

**ANSIXINTA SHARCIGA NOOTAAYADA DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG:**

**MADAXWEYNAHA DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG,**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 50aad farqaddiisa 12aad ee Dastuurka Dowlad Gobaleedka Galmudug

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 35aad Farqaddiisa 1aad ee Dastuurka Dowlad Gobaleedka Galmudug

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Guddoonka Baarlamaanka Galmudug Tix: XGBGM/0038/21 ee 31 August 2021 kuna saabsan ansixinta Sharciga Shirkadaha Nootaayada Dowlad Gobaleedka Galmudug

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida ay Galmudug u qabto Sharcigaan

**Waxa uu Madaxweynaha Dowlad Gobaleedka Galmudug soo saaray Xeerkan**:

**Qodobka 1aad:**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa la oggolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Shirkadaha Nootaayada Dowlad Gobaleedka Galmudug

**Qodobka 2aad:**

Waxaa uu Xeerkan dhaqan-gelayaa isla maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo. Laga billaabo marka la saxiixo, waxaa la baabi'yay Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Dowlad Gobaleedka Galmudug.

**Mudane, Axmed Cabdi Kaariye (Qoorqoor)**

**Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug**

# JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOMAALIYA

## Dawlad Gobaleedka Galmudug

# Sharciga Nootayada

**[SHARCI LR #010/2021]**

**JULY 2021**

# Tusmo

**Cutubka 1aad** .......... **5**
Qodobka 1aad Guud a haan haynta keydka, ka reebitaanka nuqulo dukumiintiga iyo koobitaanka nuxurka.5
Qodobka 2aad Nootaayada .......... 5
**Cutubka 2aad** .......... **6**
Qodobka. 3aad Cinwaanka iyo Tababarka Nootaayada .......... 6
Qodobka. 4aad Golaha Nootaayooyinka .......... 6
Qodobka. 5aad Tababarka Nootaayooyinka .......... 6
Qodobka 6aad Tababartaha Nootaayooyinka .......... 7
**Cutubka 3aad** .......... **7**
Qodobka. 7aad Tababarka iyo magacaabidda nootaayonimada .......... 7
Qodobka 8aad Dhameestirka Tababartaha Nootaayooyinka .......... 7
Qodobka 9aad Awoodda Hubinta .......... 7
Qodobka 10aad Magacaabista Gudigga Imtixaanka .......... 7
Qodobka 11aad Nuuca Imtixaanka .......... 8
Qodobka 12aad Natiijadda Imtixaanka .......... 8
Qodobka 13aad Doorka Wasiirka Ee Tartanka Imtixaanaadka .......... 9
Qodobka 14aad Qeybgalayaasha .......... 9
Qodobka 15aad Raadka tartanka .......... 9
**Cutubka 4aad** .......... **10**
Qodobka 16aad Isticmaalka mehrada nootaayanimada .......... 10
Qodobka 17aad Shaabadda .......... 10
Qodobka 18aad Furitaanka Xafiiska Notaayadda .......... 11
Qodobka 19aad Raritaanka Xafiiska Nootaayadda .......... 11
Qodobka 20aad Waqtiga Shaqada Nootaayadda .......... 11
Qodobka 21aad Faahfaahinta Xafiiska Nootaayadda .......... 12
Qodobka 22aad Warbixinta Nootaayadda .......... 12
Qodobka 23aad Hawlaha Ka Reeban Nootaayadda .......... 12
Qodobka 24aad Hubinta Qoraalka .......... 12
Qodobka 25aad Diidmada Amarada Wasiirka .......... 13
**Cutubka 5aad** .......... **13**
Qodobka 26aad Raritaanka nootaayaha .......... 13
Qodobka 27aad Hubinta Raritaanka nootaayaha .......... 13
Qodobka 28aad Wareejinta nootaayadda .......... 13
**Cutubka 6aad** .......... **14**
Qodobka 29aad Wayidda Xubinta Nootaayadda .......... 14
Qodobka 30aad Ka Tanaasulidda Nootaayadda .......... 14
Qodobka 31aad Iscasilaada .......... 14
Qodobka 32aad Go,aanka Wasiirka .......... 14
Qodobka 33aad Shaqo Kala Wareegidda Nootaayadda .......... 14
Qodobka 34aa Ilaalinta Shaabadda Nootaayadda .......... 15
**Cutubka 7aad** .......... **15**
Qodobka 35aad Wakiilada .......... 15
Qodobka 36aad Qodobada Nidaamiya .......... 16

**Cutubka 8aad** ........ **16**
Qodobka 37aad Qaabka Qoraalka Nootaayaha ........ 16
Qodobka 38aad Tanaasulid Wixii Lagu Heshiiyey ........ 16
Qodobka 39aad Hubinta Xaalada Shaqsi ........ 17
Qodobka 40aad Sharuudaha Marqaatiga ........ 17
Qodobka 41aad Hab Qoraalka Nootaayadda ........ 17
Qodobka 42aad Saxiixa Nootaayadda ........ 19
Qodobka 43aad Warqada Asalka Nootaayadda ........ 19
Qodobka 44aad Luuqadda Qoraalka Nootaayadda ........ 20
Qodobka 45aad Uqorista Warqadda Qof ka Naafadda ah ........ 20
Qodobka 46aad Qaabka Warqad U Qorista Dadka Naafadda ah Uqurista ........ 20
Qodobka 47**aad** Burinta Qoraalka Nootaayada ........ 21
Qodobka 48aad Baabi'inta Cadeynta Qoraalka Nootaayaha ........ 21
**Cutubka 9aad** ........ **21**
Qodobka 49aad Ilaalinta Qoraalada Nootaayaha Iyo Diiwaanka Nootaayaha ........ 21
Qodobka 50aad Dhawrista Qoraalada Nootaayadda ........ 22
Qodobka 51aad La Noqosho Codsiga ........ 22
Qodobka 52aad Diiwaan-gelinta Heshiiska ........ 23
Qodobka 53aad Qaybinta Diiwaanka ........ 24
Qodobka 54aad Gudbinta Diiwaanka ........ 24
Qodobka 55aad Xiliyadda Gudbinayo Heshiis ........ 24
Qodobka 56aad Ilaalinta Tirsiga Diiwaanka ........ 24
Qodobka 57aad Keydinta Diiwaanka ........ 25
Qodobka 58aad Wax Ka Badalidda Warqadda Asalkaa ah ........ 25
Qodobka 59aad Warqadda Wakaalada ........ 25
**Cutubka 10aad** ........ **26**
Qodobka 60aad Qoraaladda La Soo Saaray ........ 26
Qodobka 61aad Habka Gudbinta Qoraaladda ........ 26
Qodobka 62aad Habka Saxiixa Waraaqaha ........ 27
Cutubka 11aad ........ 27
Qodobka 63aad. Xuquuqda Nootaayaha ........ 27
Qodobka 64aad Xushmada Nootaayaha ........ 27
Qodobka 65aad Bixinta Magdhowdda ........ 28
Qodobka 66aad Kharash Celin ........ 28
**Cutubka 12aad** ........ **28**
Qodobka 67aad Xubnaha Golaha Nootaayooyinka ........ 28
Qodobka 68aad Awoodaha Golaha Nootaayooyinka ........ 28
Qodobka 69aad Xilalka Golaha Nootaayooyinka ........ 29
Qodobka 70aad Anshax Marinta Hawlaha Nootaayooyinka ........ 29
Cutubka 13aad ........ 29
Qodobka 71aad Diiwaanka Nootaayaha ee Gobolka ........ 29
Qodobka 72aad Kaydinta Diiwaanka Nootaayaha Gobolka ........ 30
Qodobka 73aad Diritaanka Iyo Xaqiijin Diiwaanka Nootaayaha Gobolka ........ 30
Qodobka 74aad Fulinta Hawsha Nootaayaha ........ 30

Qodobka 75aad Tix Raaca Diiwaanka Nootaayadda ........ 30
**Cutubka 14aad ........ 31**
Qodobka 76aad Kormeerka Nootaayaha ........ 31
Qodobka 77aad Hubinta Qodobo Ciqaabeed ka ........ 31
Qodobka 78aad Hab Ciqaabeed ka Nootaayooyinka ........ 31
Qodobka 79aad Ganaaxa Nootaayooyinka ........ 31
Qodobka 80aad Laalidda Hawlaha Nootaayooyinka ........ 32
Qodobka 81aad Amarka Ciqaabta Nootaayaha ........ 32
Qodobka 82aad Ku Qasbid Iscasilaad ........ 32
Qodobka 83aad Dabbaqidda Axkaam Kala Gedisan ........ 33
Qodobka 84aad Qifiifinta Ciqaabta ........ 33
Qodobka 85aad Ciqaabta Ku Noq-Noqoshada ........ 33
Qodobka 86aad Ciqaabta Qalad Ku Wareejinta Nootaayadda ........ 33
Qodobka 87aad Anshax Darada Nootaayaha ........ 33
**Cutubka 15aad ........ 34**
Qodobka 88aad Fal Ciqaabeedka Nootaayaha ........ 34
Qodobka 89aad Saamixidda Golaha Nootaayooyinka ........ 34
Qodobka 90aad Go,aanada Ciqabeed ee Golaha Nootaayooyinka ........ 34
Qodobka 91aad Baabi’in ........ 35
Qodobka 92aad Kharashka ........ 35
Qodobka 93aad Xeer Nidaaminta ........ 35
Qodobka 94aad Dhaqan-gal ........ 35

## Cutubka 1aad

## *QAAB-DHISKA NOOYAHA*

### Qodobka 1aad

### keyd haynta, reebitaanka nuqulada dukumiintiga iyo koobitaanka nuxurka.

1. Nootaayiiste waa xafiis guud oo u taagan qaabilaada qoraalada dadka nool iyo rabitaanka ugu danbeeya aaminaadooda.
2. Nootaayuhu waxa uu kaloo damiin kayahay xaquuqaha soo socda:-
   a. hoos ka saxiixa iyo goob jooga arrimaha la xariira rabitaanada qaanuuneed iyo cilad bixinta shuruudaha gaarkaa ee dhinacyada.
   b. qaabilaada dhaarta laxariirta qoraalka nootaayaha gaarkaa iyo midka ganacsiga.
   c. qaabilaada keydinta qoraalada guud midka asalka, iyo nuqulka, qoraalada gaarkaa, warqadaha iyo dukumiintiga xataa hadii lagu soo qoray.

   saxiixida iyo ayidaada diwaanada ganacsiga sida ow qabo qodobada sharciga ee gaarkaa iyo midka ganacsiga.

   d. qoraalo ka baxsan qaanuunka cid sameyn karto ma jirto
   e. cadeynta qoralada buugaagta iyo diiwaanada ganacsiga.
   f. caddeynta shahaadooyinka iyo jiritaankoda waxaa awood u leh maxkamadaha iyo hay'adda markaas shahaadada soo saartay
   g. in laraaco habraaca soo socda kadibna lagu cadeeyo awooda garsoorka
   h. Gaarsiinta iyo wareejinta diiwaanka xaaladaha uu sheegayo qaanuunka madaniga iyo ganacsiga gaar ahaan madaniga iyo ganacsiga.
   i. Qeybaha xisaabaadka iyo garsoorka iyo dhamaan hawlaha lagama maarmaanka ah.

### Qodobka 2aad

### *Nootaayada*

1. Xafiiska nootaayada waa ka duwan yahay hay'ad kasta oo dawladeed ama mid rayid oo qaata ama bixiya lacag, sidoo kale qareenada, wakiilada, iyo ganacsatada.
2. Waxaa ka reeban axkaamtan shaqaalaha joogtada ah ee ku hawlan waxbaridda (cilmiga iyo adabka) xafiisyada iyo hay'adah gaarka ah ee ka shaqeeya tacliinta.

**Cutubka 2aad**

***Qodobka. 3aad***

***Cinwaanka iyo Tababarka Nootaayada***

1. Diiwaanka tababarka nootaayada waxaa haynaya golaha nootaayooyinka.

Qofkii raba in uu is qoro tababarka waa in uu codsi usoo qortaa golaha nootaayooyinka, kuna soo lifaaqaa shahaadooyinka ogolaanshihiisa sugaya sida ku cad qodobada 3aad, 4aad ee sharci no. 8 ee 15 febraayo 1962, aan ka aheyn cadeenta rabitaankiisa in uu rabo ka qeyb galka tababarka.

2. Golaha nootaayooyinka waxa uu sugayaa qoritaankiisa, go'aankiisa waana in uu noqdaa mar kasta mid sababeysan

***Qodobka. 4aad***

***Golaha Nootaayooyinka***

1. Xoghayaha golaha nootaayooyinka waa in isla markaa la soo weydiyo ka qeyb galka tababarka nootaayanimada waa in uu u sameeya diinwaan gaar ah.

2. Waa in dukumentiga ogolaashaha laga helaa macluumaadka goobta iyo taarikhda dhalasho, deegaanka ka qeyb galaha, taariikhda qalin jebinta ama diplomaha iyo magaca nootaayada iyo halka uu ku sameyn doono tababarka

***Qodobka 5aad***

***Tababarka Nootaayooyinka***

1. Waqtiga tababarka waxaa laga bilaabayaa maalinta diiwaan gelinta la-tababarayaasha.
2. Tababarka waa in uu noqdaa mid wax ku ool ah joogtana ah, haddii uu kala go'o yimaado, tababartayaasha waa in ay latashi la sameeyaan golaha nootaayooyinka, sababaha keeney kala go'a iyo waxa ay kala socdaan kala go'a iyaga oo fiiro gaar ah ka yeelanaya maamulka tababarka hawlahoodi hore.
3. Tababarka waa in uu yeeshaa dhextaal haddii la tabarayaashu ay awoodaan ka qeyb gal xafiiska nootaayaha xitaa waqtiyo ilaa hal bil gaareysa.
4. Si loo hubiyo sii socoshada tababarka la tababarayaashu waa in ay iska soo xaadiriyaan labadii bilood mar golaha nootaayooyinka, shahaadada nootaayanimadana waxaa dhameystiraya xoghayaha golaha nootaayooyinka iyada oo lagu qorayo diiwaanka la tabarayaasha.
5. Dhameystirka tababarka iyo isticmaalka shahaadada tababarka nootaayanimada waxaa bixinaya guddoomiyaha golaha nootaayooyinka.

### *Qodobka 6aad*
### *Tababartaha Nootaayooyinka*

1. Tababartaha raba sii wadashada hawshiisa nootaayo kale waa in uu cadeyn usoo gudbiyaa golaha nootaayooyinka, isaga oo soo gudbinaya cadeenta gudashada waajibaadka tababarkiisii hore, sidoo kale cadeynta ogolaanshaha nootaayada uu rabo in uu ka sii wato tababarka.
2. Ogolaanshaha qorshaha xoghayaha golaha waxa uu ku qorayaa diiwaanka la tababarayaasha.

## Cutubka 3aad
### *Tababarada Nootaayaha*
### *Qodobka. 7aad*
### *Tababarka Iyo Magacaabidda Nootaayonimada*

1. Magacaabida nootaayanimada waxaa la go'aaminayaa waqtiga imtixaanka tababarka. Kamana qeybgali karaan tababarka dadka da'doodu ka sareyso 65 sano xiliga tababarka la shaacinayo

### *Qodobka 8aad*
### *Dhameestirka Tababartaha Nootaayooyinka*

1. Tababarku waxa uu ku dhameestirmayaa go'aanka wasiirka garsoorka, go'aanku waxa uu ku xadidan yahay tirada jagooyinka iyada oo la xadidaayo waqtiga tababarka, kala horeynta cadeynta waqtiga qabashada dukumintiga codsiga ee ka qeybgalayasha, ka qeyb galayaashu waa in ay fuliyaan shuruudaha ku xusan qodobka 1aad ee sharci no.8 15 febraayo 1961 kuna cad qodobada habka imtxaanka kuna xusan maalmaha uu noqonayo imtixaanka qoraalka ah.

### *Qodobka 9aad*
### *Awoodda Hubinta*

1. Wasiirka caddaaladda ayaa xaq u leh hubinta dhamaan arimaha daboolaya fursadaha, waxa uuna go'aan ka qaadanayaa ogolaanshaha rabitaanka shaqsi iyo in ay noqonayaan ka qeybgalayaasha.

### *Qodobka 10aad*
### *Magacaabista Guddigga Imtixaanka*

a. Gudiga imtixaanka oo lagu soo magacaabey go'aanka wasiirka garsoorka waxa uu ka kooban yahay:

    a. Garsoore madax u ah.
    b. Qof shaqaale ah oo ka tirsan wasaaradda garsoorka.

c. Qof aqoon leh oo ka tirsan macalimiinta kuliyadaha sharciga ama qof nootaayiiste ah.

b. Isla go'aankaan wasiirka waxa uu awoodaa in uu u magacaabo guddigaan qof ka tirsan kaaliye-yaasha xogheyn ahaan.

***Qodobka 11aad***
***Nuuca Imtixaanka***

1. Imtixaanka waxa uu noqonayaa qoraal iyo af, imtixaanka qoraalka waxa uu ka koobnaanayaa cadeeymo, aragtiyo iyo ficilo ku saabsan go'aan dad nool dhex maray, qoraalka kama dambeeysta ah ee rabitaankooda shaqsi iyo waafajinta rabitaanka sharci ee mawduuc kasta oo la weydiisto, kulminta iyo habeynta mabaadi'da qaanuuneed ee la xiriirta mawduucaas isaga ah.

2. Imtixaanka afka waxa uu ka koobnaanayaa 3 qeybood oo kala duwan waxaana ka mid ah mawduucyadaan:

   a. Xeerka madaniga iyo ganacsiga gaar ahaan aragtiyada qaanuuneed ee xiriirka la leh xafiiska nootaayaha.
   b. Qodobada nidaaminta nootaayanimada iyo keydinta ku saabsan canshuurta hawlaha.

3. Midkasta oo kamid ah imtixaanka qoraalka iyo midka afka ah xubinkasta waxa ay leedahay 10 darajo, uma gudbayo imtixanka afka tartamaha aysan gaarin natiijadiisu 18 darajo maado kasta oo kamid ah maadooyinka imtixaanka.

4. Gudiga isaga oo sal uga dhigayo isu geeynta natiijooyinka barashada mid kasta oo ka mid ah tartamayaasha waxa uu noqonayaa mid munaasib ah.

5. Natiijooyinka waxa ay u dhigmaan mudnaanta la siinayo kuwa ka gudbey tartamadii hore ee imtixaanka nootaayanimada, iyada oo mudnaanta sal looga dhigayo natiijada midka ugu mudan imtixaankaas.

6. Isla shuruudahaan waxaa mudnaanta la siinayaa midka ugu dhameyska badan ee ugu waqtiga dheer tababarka nootaayanimada kadibna midka ugu da'da weyn.

***Qodobka 12aad***
***Natiijadda Imtixaanka***

1. Go'aanka gudiga waa in ay ka soo qeeyb galaan dhamaan golaha oo dhan.
2. Dhamaan hawlaha tartanka waa in loo diyaariyaa si sugan iyada oo hoos ay ka saxiixayaan gudoomiyaha gudiga iyo xoghayaha gudiga.

***Qodobka 13aad***
***Doorka Wasiirka Ee Tartanka Imtixaanaadka***

1. Wasiirka garsoorka waxa uu uga qeeybgali karaa tartanka xubin sharafeed, waxa uuna ka soo qeeyb gali karaa fadhiyada guddiga mar allaale markii ay lagama maarmaan noqoto, waxa uuna awood u leeyahay in uu baabi'iyo tartan kasta oo qilaafsan nidaamka.

***Qodobka 14aad***
***Qeybgalayaasha***

1. Liiska ka qeybgalayaasha ee uu ogolaadey wasiirka garsoorka, kadib markii la hubiyo nidaamka hawlaha tartanka, kala saaridda ugu horeysa ee tirada ka qeybgalayaasha tartanka.
2. Dhinaca kale waa in lagu shaaciyo liiska ka qeybgalayaasha ku gudbey tartanka faafinta rasmiga ee DGGM.
3. 15 maalmood faafinta ka dib waa in ay u gudbiyaan wasaarada cadeyn qeexan ee goobaha loo cayimey.
4. Socodka mudada ku cad faqrada hore wasiirka waxa uu soo saarayaa liiska magacyada gudbayaasha tartanka iyo ogolaanshaha goobahooda iyada oo loo raacayo liiska la shaaciyey.
5. Iyada oo la raacayo liiska cidda ka maqan cayimida goobta laguma wareejinayo goobta, ku wareejinta goobta wasiirka waxa uu ku bixinayaa xafiiska.

***Qodobka 15aad***
***Raadka tartanka***

1. Marka ay soo dhameeystiranto tirade goobaha ku tilmaman kooxaha, sideey ahaataba awooda wasiirka garsoorka ee ah in uu ka dhex magacaabo nootaayo ka qeyb galayaasha tartanka ama aanu umagacaabin sabab la'aan, ka qeybgalaha tartanka waxa uu sheegayaa in aan lagu xusin sida liiska ugu qoran. Waxa ayna ku gudbisan karaan dalabkooda isla qaabkii hore, xitaa hadii la magacaabo ka dib ama xitaa hadii nootaayaha la magacaabey waajibaadkiisa ku gudan waayo muddo cayiman, xaaladaas oo kale awooda magacaabidda ma noqon karto mid uu isticmaalo, xitaa hadii la faafiyey go'aanka waana in uu tartan cusub soo sameeyaa.

**Cutubka 4aad**

***Meheradaha Nootaayada***

***Qodobka 16aad***

***Isticmaalka mehrada nootaayanimada***

Inta aan isticmaalin nootaayada mehradda nootaayanimada

1) waa in uu Dhaar ku maraa guddoomiyha golaha nootaayooyinka hortiisa , in uu aamin u noqonaayo DGGM iyo madaxweeynihiisa isaga oo ilaalinaya sharciga dawladda iyo in uu ku gudanayo waajibaadka xafiiska damiir wanaagsan.
2) In uu usoo bandhigaa golaha nootaayooyinka shaabadda.
3) In uu yeesho diiwaan u gaar ah, laga diiwaan geliyey xoghyaha golaha nootaayooyinka raacsan saxiixiisa.
4) In uu guto waajibaadka ku cad qodobka 2aad.

***Qodobka 17aad***

***Shaabadda***

1. Shaabada lagu soo sheegey faqradda 2aad ee qodobka 16aad waa in uu cabirkiisu ahaadaa 35mm waana in uu ugu dheganaadaa astaanta qaranka iyo nambarka iyada oo aan la raacineynin cinwaanka iyo calaamad kale.
2. Markaa natiijada wareejinta nootaayada ama sababo kale, waxa ay keenaysaa wax ka bedelka calaamadaha cinwaanka, golaha nootaayooyinka waa in ay ogolaadaan shaabadda cusub kadib markii uu ka noqdey tii hore.
3. Hadii ay lunto shaabadu, golaha nootaayooyinka waxa ay ogolaanayaan mid kale, taas oo naqshad gaar ah leh oo ka duwanaaneysa tii hore loo sameeyay, hadii dib loo helo shaabadii hore ee qadiimka aheed ma istecmaalayo nootaayadu waxa uuna isla markiiba dib ugu celinayaa golaha nootaayooyinka.
4. Hadii shaabada ku soo noqoto waqti go’an ee uu tilmaamayo faqrada 2aad ee qodobkaan, waa in ay ku soo noqotaa gudoomiyaha golaha nootaayooyinka agtiisa iyada oo la baabi’iyey lana saarey calaamad istilaab ah, waana in ay halkaasi u taalaa sida nootaayada aan isticmaaleynin oo kale ee ku xaniban golaha.
5. Inta aan lagu wareejin shaabada cusub waa in ay damaanad u taalaa waxyaabaha lagma maar maanka u ah diiwaanka ee ku cad faqrada 3aad ee qodobkaan.
6. Nootaayada waxaa ka reeban isticmaalka shaabad kale taas oo ay horey u baabi’iyeen golaha nootaayooyinka.

***Qodobka 18aad***
***Furitaanka Xafiiska Notaayadda***

1. Nootaayada waa in 60 maalmood gudahood, maalinta uu ka baxay faafinta rasmiga ee DGGM ee la faafiyey go'aanka magacaabida uu soo dhameystiraa qaabka uu sheegayo qodobka 17aad, waana in uu ka furaa xafiiska goobta loo cayimay.

2. Waqtigaas waxaa soo yareen karaa wasiirka garsoorka marka ay jirto dan guud, sida uu awoodo 60 maalmood oo kele in uu ku daro dhibaato ama sababo la cadeeyey marka ay jirto.
3. Cadeenta furitaanka xafiiska nootaayaha waa in uu ka soo saaraa golaha nootaayooyinka shahaado ogolaasho ee ka soo baxday guddoomiyaha goobta laga furaayo, marka la soo buuxiyo warbixinada lagama maarmaanka ah.

***Qodobka 19aad***
***Raritaanka Xafiiska Nootaayadda***

1. Axkaamta qodobada 17, 19 waxa ay baaqi ahaanayaan xitaa xaaldaha guuritaanka nootaayada goob kale waa la dabaqayaa.

2. Nootaayada u guura goob kale waxa uu xaq u leeyahay in uu furo xafiiska waqtiga uu xaqa uu u siinayo sharciga ama waqtiga wasiirka garsoorka u gooyey ee ku xusan qodobka 20aad ee isla sharcigan si uu u hanto hawshiisa goobta cusub.

3. Awoodaas waxa ay imaan kartaa isla markii uu bilaabo hawshiisa.

***Qodobka 20aad***
***Waqtiga Shaqada Nootaayadda***

1. Si loo xaqiijiyo habsami u socodka iyo joogteynta xafiiska, nootaayada waa in uu cayimaa goobta uu ka furayo xafiiska iyo dhigaalka qoraalada , diiwaanka iyo nambarka nootaayaha, sidoo kale joogitaanka xafiiska nafsad ahaantiisa, maalmaha todobaadka iyo saacadaha uu xadeyn doono guddoomiyaha golaha nootaalayaasha.

2. Nootaayada kama maqnaan karo goobta wax ka badan 10 maalmood xilli kasta, waxaa ka reeban marka uu jiro hawl qaran ama gudashada waajibaadkiisa shaqo.

3. Ka maqnaanshaha waqti dheer waa in uu ogolaasho ka helaa guddoomiyaha golaha nootaayooyinka, kaas oo aan ka badnaan karin mudo hal bil ah, wixii ka badan mudadaas waxaa bixin kara wasiirka isaga oo dhageeysanaya ra'yiga golaha nootaayooyinka.

### *Qodobka 21aad*
### *Faahfaahinta Xafiiska Nootaayadda*

1. Nootaayada waa in uu ku dhejiyaa dibada xafiiskiisa boor ay ku cad yihiin hawshiisa gaarka ah.

2. Boorka waa in uu noqdaa mid ay dad weeynaha qaab fiican u arki karaan, iyada oo lagu cadeeynayo maalmaha iyo saacadaha uu furan yahay xafiiska ee isaga shaqsi ahaan uu joogo iyo maalmaha kale iyo saacadaha kale halka laga helaayo, dhinacyadana waxa ay kula xiriiri karaan qaabka isgaarsiinta.

### *Qodobka 22aad*
### *Warbixinta Nootaayadda*

1. Nootaayada waa in uu siiyaa warbixin wasiirkiisa markasta xitaa hadii aan laga dalbin.
2. Nootaayada waa in uu gutaa hawshiisa hadii ay jirto xaalad muhiim ah oo degdeg ah qatarna ah, waxa una si toos ah ku weydiisan karaa jiritaanka awoodiisa wax ka weyn.

### *Qodobka 23aad*
### *Hawlaha Ka Reeban Nootaayadda*

1. Nootaayada ma qaban karo qoraalada:

   a. Hadii uu sharciga si u diidaayo ama dhaqanka suuban ama nidaamka guud.
   b. Hadii ay dhinac ka noqoneyso xaaskiisa, waalidiinteeda ama qaraabadeeda dhaw heer kasta, marka uu yahay dhinaca damaanadaha ilaa sadex fac xaaladaas ka noqonayaa wakiil ama mas'uul qaanuuni.
   c. Hadii axkaamta ay isaga si toos ah u quseeyso ama xaaskiisa ama qof walidiinteeda ka mid ah, ama qaraabadeeda darajo hoose ha noqdo ama qof uu wakiil u yahay waraaqihii u saxiiay, ama warqado sir ah oo isaga marqaati ka yahay ama lagu xusay qof madax ah oo isaga diiwaan geliya.

2. Axkaamta ku xusan nambarka 2aad iyo 3aad ee sharcigan waxaa ka reeban wixii ka dhalanaya iska hor imaad xaas uu horey u furey ama waalidiinteeda ama waalidiinta xaas isaga ay ka dhimatay, darajooyinkii aan soo sheegnay la dabaqaayo oo aan ka ahayn xaaladaha xaraashka.

### *Qodobka 24aad*
### *Hubinta Qoraalka*

1. Nootaayada ma qaban karo qoraal uu dhinac ka yahay qof aan jirin, ama aanu leheen qaabka sharcigu tilmaamayo ilaa laga helo qof jira ama wakiiladiisa qaanuuniga ah.

***Qodobka 25aad***
***Diidmada Amarada Wasiirka***

1. Nootaayada wasiirkiisa wuu ka diidi karaa hadii dhinacyada bixin waayaan canshuurta soo dejinta masaariifta iyo qarashka qoraalka, aan ka aheen xaalada dadka xaqooda lagu ilaalinayo ama wax lagu siinayo ama maragga

**Cutubka 5aad**
***Rarida Nootaayada***
***Qodobka 26aad***
***Raritaanka nootaayaha***

1. Nootaayada waxa uu u rari karaa nootayadiisa goob kale, go'aanka wasiirka garsoorka marka uu soo weydiisto.
2. Soomana weeydiisan karo raritaanka nootaayada meel intuu deganaa oo hawshiisa ku fulinayey ka yar sadex sanadood.

***Qodobka 27aad***
***Hubinta Raritaanka nootaayaha***

1. Marka ay dhaboowdo rabitaanka nootaayada wasiirka garsoorka wax ogeeysiis ah ma raacsiinayo faafinta rasmiga ee dawladda.
2. 30 maalmood gudahood waqtiga la shaaciyey sugitaanka goobta uu degayo waa in uu keenaa golaha nootaayooyinka codsi lamid ah, kaas oo 20 maalmood oo xiriir ah markay ka dhamaato waqtiga dhicitaanka waxaa loo gudbinayaa wasiirka si loo mudeeyo soo jeedinta.
3. Ku wareejinta goobta, rajo sugayaal badan, kala saarka waxa uu noqonayaa qaab gaar ah, sida waayo-aragnimo shaqo, aqlaaqda damiirka qofka, natiijada tartanka magacaabida nootaayanimada, waraaqaha maaliyada iyo adeegyada qaanuuneed ee loo gudbiyey xafiiska danta guud ee ay gutaan nootaayooyinka

***Qodobka 28aad***
***Wareejinta nootaayadda***

1. nootaayada go'aanka joojinta hawlaha goobta uu u rarey waa in uu usoo gudbiyaa qof ahaan ama wakiil gaarka ku wareejinta kaydka nootaayaha ee gobolka, dukumintigii la soo saaray diiwaankiisa iyo nambarkiisa.

## Cutubka 6aad

### *WAAYIDA XUBIN-NIMADA*

### *Qodobka 29aad*

### *WAYIDDA XUBINTA NOOTAAYADDA*

1. Ka reebitaanka nootaayaha waxa uu noqonayaa:

    a. Marka uu dhameeysto da'diisa 70 sano.
    b. Ka laabashada gudashada hawshiisa.
    c. Hadii ay ku timaado gudasho la,aan shaqadiisa sababo daciifnimo xaga maskaxda ama caafimaad daro.

2. Hadii daciifnimada xaga maskaxda ama caafimaadka xagiisa uu noqdo keliya waqti kooban, nootaayaha waxa uu ahaan karaa mid hawshiisa ka fadhiista waqti xadidan oo aan ka badneyn hal sano hadii ay hal sano ka badnaato daciifnimada xaga maskaxda ama caafimaadka waa ka joogsanayaa hawsha.

### *Qodobka 30aad*

### *Ka Tanaasulidda Nootaayadda*

1. Ka tanaasulida nootaayaha waxa uu noqonayaa:

    a. Hadii uu aqbalo qabashada hawl ka reebeysa in hawsha nootaayanimada sii wato.
    b. Hadii uu ka joogsado sabab la'aan laba bilood wax ka badan goobtiisa.

### *Qodobka 31aad*

### *Iscasilaada*

1. Karti darada, laalitaanka iyo casilaada nootaayaha waxa ay ahaanayaan sida ku cad cutubka 2aad cinwaanka 6aad.

### *Qodobka 32aad*

### *Go,aanka Wasiirka*

1. Dhicitaanka magacaabidda, ka reebitaanka, tanaasulidda, casilaadda, karti darada nootaayaha waxaa ku dhawaaqaya wasiirka garsoorka, waxa uuna ku soo saarayaa go'aan markii uu dhageystay talada golaha nootaayooyinka.

### *Qodobka 33aad*

### *Shaqo Kala Wareegidda Nootaayadda*

1. Hadii uu dhinto ama si Kama dambeeys ah hakin loogu sameeyo hawsha nootaayada diiwaan hayaha nootaayooyinka waa in uu la wareegaa shaabadaha dhamaan qoraalada,

tirsiga, diiwaanada, iyo dhamaan waraaqaha la xiriira xafiiska nootaayada iyo wixii kale ee xiriirka la leh xafiiska nootaayaha meelo kale.

2. Marka ay dhamaato fulinta arintaan ama ay sugnaato ka wareejinta shaabadaha la diyaariyo keydka qoraalada tirsiga iyo diiwaanada waxaa la dhigayaa diiwaan hayaha.

3. Xaaldaha laalitaanka karti darada ama ka reebitaanka golaha nootaayooyinka waa in uu haraa qoraalada tirsiga iyo diiwaanka nootaayaha la laaley karti darnaadey ama laga reebey ama si ku gaar ah ayey u laalayaan diiwaank hayaha nootaayooyinka gobolka.

### *Qodobka 34aad*
### *Ilaalinta Shaabadda Nootaayadda*

1. Shaabada nootaayaha dhintey ama laga hakiyey shaqada ama u wareegay goob kale waa in ay taalaa oo lagu ilaaliyaa golaha nootaayooyinka agtooda haddii aaney suurto gal aheyn in ku warejinta nootaayaha waxaa la dhigayaa diiwaan hayaha nootaayooyinka gobolka.

2. Soo saarida waxa ay ahaaneysa amarka guddoomiyaha golaha nootayooyinka, calaamad, faqrada afaraad ee qodobka 19aad halkaas ayuu yaalaa isaga oo aan anfac laheyn laakin lagu ogaanayo.

3. Waa in ay si cad u sugnaato yaalitaanka keydka nootaayada si ku meel gaar ah loo hakiyey hawshiisa ilaa waqtiga hakinta.

## Cutubka 7aad
## *Wakiilada Nootaayada*
### *Qodobka 35aad*
### *Wakiilada*

3. Markii ay jirto maqnaansho, laalitaan, karti daro, cudur sababey ama wax kasta oo keeni Kara xil gudasho la’aan ku meel gaar ah nootaayada ma qaban karo hawsha qof kale, wasiirka garsoorka isaga oo fiirinayo codsiga nootaayaha ama xafiiska markii uu dhageeysto talada golaha nootaayooyinka waxa uu ka magacaabi karaa wakiil dhamaan dadka soo codsadey nootaayanimada dhaxdooda ama nootaayayaasha shaqeeya ee u dhaw goobta.

4. Wakiilka waxa uu ku qabanayaa dhamaan hawsha danta iyo nootaayaha la fadhiisiyey, waajibaadka dhaamaana mawada qaadayo sidoo kale mayeelanayo xaq la wareegidda mustaqbalka.

***Qodobka 36aad***
***Qodobada Nidaamiya***

1. Waa isku mid dhamaan wakiilada qodobada nidaamiya nootaayada marka la dabaqayo. Shaabada wakiilka waxa uu ka koobnaanayaa qoraal yar (M……….M………….M……..) wakiilka (M…….M…….M …….) nootaayo (M…….M……)
2. Nootaayaha wakiilka ah waxa uu mas'uul ka yahay xiliga kooban ee uu u istaagayo hawsha loo wakiishay, faa'idada ka dhalatana waa mid qiimeynteeda leh.

**Cutubka 8aad**
***QORAALADA NOOTAYADA***
***Qodobka 37aad***
***Qaabka Qoraalka Nootaayaha***

1. Qoraalka nootaayada ma noqonayo mid ansax ah hadii aan goobjogayaal ka aheen dhinacyada, hadii sharcigu tilmaamin si ka duwan iyo 2da marqaati.
2. Goobjooga marqaatiyada muhiim ma aha haddii qoraalada ku qoran 1-8 ee qodobka 1aad sidoo kale tasdiiqinta waraaqaha ku xiran nidaamak maaliyadda (jeegaga) iyo guud ahaan warqadaha ganacsiga ee wareega.
3. Waxa uu kulminayaa dhamaan qoraalada bilowga ilaa dhamadka, xitaa xaaladaha qofka uu u qoraayo amaanadiisa qof kale, waa qasab inuu mideeyaa rabitaanka 2da dhinac marka la qoro Lana aqriyo qoraalka waa in rabitaankooda ay ku ogolaadaan.

***Qodobka 38aad***
***Tanaasulid Wixii Lagu Heshiiyey***

1. Dhamaan qoraalada dadka nool oon ka aheen hibada iyo heshiiska guurka, dhinacyada yaqaana wax aqrista iyo wax qorista waxa ay awood uleeyihiin tanaasulid wixii lagu heshiiyey iyada oo loo kaashanayo qoraalka marqaatiyo, notaayaha waxa uu ka sameeynayaa qoraal deg deg ah mabaadi'da heshiiskaas.
2. Hadii dhinacyada mid kood aanu ogoleen tanaasulida qoraalka waa in uu aadaa mid u dhameystiran joogitaanka marqaatiyada. Qoraalka waxa uu ku dhameystirmayaa ogolaanshaha dhinacyada iyo joogitaanka marqaatiyada.

### *Qodobka 39aad*
### *Hubinta Xaalada Shaqsi*

1. Nootaayada waa in uu shaqsi ahaan u hubiyaa xaalada shaqsi ee dhinacyada.
2. Hadii uu aqoonsan waayo waa in la helaa 2qof oo lagu kalsoon yahay ee yaqaana qofka waxa ayna noqon karaan marqaatiyo.

### Qodobka 40aad
### *Sharuudaha Marqaatiga*

1. Marqaatiga waa in uu qaan gaar ahaadaa, muwaadin soomaaliyed ahaadaa ama ajnabi leh degenaansho ama leh xuquuq awooda isticmaalka xuquuqda madaniga ah, laakin aanu dano gaar ah ka laheen qoraalka.

2. Marqaati ma noqon karo qof da'a ah, qof dhega la'a, qof Af la'a, kuwaas lama horkeeni karo nootaayaha hortiisa sidoo kale dhinacyada xiriirka la leh ee ku qoran qodobka 25aad sidoo kale kuwa aan caafimaad qabin ama aan wax saxiixi Karin.

3. Kuwa niyadsamida ku sameeyaan waa in ay codsadaan sugnaanshaha marqaatiga laakiin waa in aysan noqon mid is hortaaga xiriirka iyo faqrada aan soo tilmaanay, mana aha midka aan waxba aqoonin iyo midka aan waxba saxiixi karin.

### Qodobka 41aad
### *Hab Qoraalka Nootaayadda*

1. Qoraalka nootaayaha waa in uu lahaadaa qaabkaan soo socda:

    a. Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
    b. Dawlad Gobaleedka Galmudug

2. Qoraalku waa in uu ka kooban yahay:

    a. Cadeynta iyada oo qoraal ah, sanadka, bisha, maalinta iyo meesha ay ugu timid.
    b. Haybta, iyo calaamada goobta nootaayaha.
    c. Haybta, goobta iyo taariikhda dhalasho, degnaanshaha shuruudaha dhinacyada, marqaatiyada, niyadsamida haddii dhinacyada midkood uu ugu soo qeybgalay qoraalka wakiil ahaan arimahaas looga sameeynayo xushmeyn dhinacyada dhexdooda oo kaliya ee waa xushmeyn wakiiladooda.

3. Wakiilka waa in uu ugu qeyb galaa qoraalka nafsad ahaantiisa hadii asalka yahay iyo hadii nuqulka yahayba ama hadii asalka iyo nuqulkaba aan laga heleynin qoraalka nootaayahay dhintey.

4. Cadeynta hubinta qoonsiga dhinacyada shaqsi ahaaneed iyo hubinta macluumaadkooda lagu helo habka niyad samida.
5. Tilmaamida ugu yaraan marka ugu horeysa qoraal isku mid ah walxo isku mid ah isku tiro ah loo sameeyo ujeedadeeda qaab isku mid tahay.
6. Sawirka dhabta ah ee walxaha isku midka ah qoraalka ujeedadiisa, qaab aan la awoodin in wax looga bedelo mid kale.
7. Hadii uu qoraalka yahay mid ku saabsan hanti maguurto ah markaa waxaa loo sawirayaa si ay suurto gal u tahay iyada oo la cadeeynayo dabeecadahooda meelaha laga helo, xudduudahooda, iyo xaqiijinta aqoonsiga maguurtada.
8. Tilmaamida cinwaanka qoraalka iyo mudadeeda si loo haleelo nuxurka qoraalka.
9. In la cadeeyo qoraalka leh waraaqaha maaliyada taariikhdeeda nootaayada loona aqriyey dhinacyada iyada oo goob joog yihiin marqaatiyada hadii ay tilmaameyso.
10. In lagu sheego qoraalka nootaayada la qoray ama dadka uu isaga ku kalsoon yahay iyada oo la tilmaamayo waraaqaha inta bog ee uu ka kooban yahay qoraalku.
11. Saxiixitaanka iyada oo ay la socdaan cadeynta heybta dhinacyada, kuwa la aaminsan yahay, turjumaanada, marqaatiyada iyo nootaayaha.
12. Kuwa la aaminsan yahay way fogeeysan karaan cadeynta sida ku qoran faqrada 4aad xaaladaas waa in uu saxiixaa cadeynta ka dib nootaayada waa in uu sheegaa.
13. Hadii dhinacyada kuwa la aaminay midkood aanu aqoon ama aanu saxiixi karin waa in uu cadeeyaa sababta uu u diiday nootaayahana waa in uu sheegaa cadeyntaas.
14. Rabitaanka ugu dambeeya ee qoraalka, xadeynta waqtiga saxiixa marka la gaaro xadeyntaas waa in si cad loo sameeyaa marka ay dhinacyada weydiistaan, ama nootaayada uu u arko munaasab, ama qoraalo kele.
15. Qoraalka waa in uu ka koobnaadaa dhawr waraaqadood, waana in ay warqad kaasta ay saxiixnaataa, dhinacyada, tujumayaasha, marqaatiyada iyo nootaayada waana in uu ku aqbalaa waraaqaha saxiixa ugu dambeeya.
16. Saxiixa la saarayo waa in ay saarnaataa warqad kasta oo qoraalka ka mid ah, iyo warqadaha maaliyada ee qoraalka, waana in uu aqbalo waraaqaha diiwaanka guud.
17. Haddii dhinacyada ka soo qeyb galay, ay la socodaan ayna owoodi karaan in ay saxiixan, ayna ogolaadan sida faqrada lixaad ku qoran, markaa saxiixoodu mid kasta oo iyaga ka mid ah waxa uu wakiil ka noqonaya dhinaca soo wakiishay ee danahooda kala duwan.

18. Saxiixa fudud ee nootaayaha ee waraaqaha dhexe ma aha mid ahmiyad leh haddii qoraalka dhamaan ku saxiixo gacantiisa.

**Qodobka 42aad**

***Saxiixa Nootaayadda***

1. Saxiixa nootaayada waxa uu ahaanayaa ugu dambeynta qoraalka waana in ay sinaataa tiimbarihiisa.

**Qodobka 43aad**

***Warqada Asalka Nootaayadda***

1. Warqada asalka ee qoraalka nootaayaha waa in ay ku qornaataa qad aan tirmeeynin, ahna mid la fahmi karo, si fududna lagu aqrin karo, aanu yeelan daldalool ama meelo banana oo aan xariiq marsaneyn, soo gaabin la'aan, tirtir la'aan, bedelaad la'aan qoraalka korkiisa.
2. Hadii ay danta keento baabi'inta ama wax ku kordhinta qaar ka mid ah qoraalka saxiixa dhinacyada horteed kuwa la aaminsan yahay ama turjumaha ama marqaatiyada nootaayada waxaa ku waajib ah:-
    a. Tirtirida xaqiijinta erayada la rabo in la baabi'iyo ama in loo bedelo qaab si fasiix ah loo aqrin karo mar kasta.
    b. In uu qaataa erayada la bedelaayo ama lagu kordhinayo halka ugu dambeysa qoraalka daraf ka raacis ah inta aan la saxiixin ka hor.
    c. In la sheego ugu dambeynta qoraalka iyo ugu dambeynta marka la saxiixayo nambarka iyo tirada erayada la tirtirey, tirade erayada daraf ka raacinta, sidoo kale hadii la sameeyay markii qoraalka la aqriyey ka dib.
3. Xaaladaha kuwa la'aaminey ay gadaal ugu soo biiraan qoraalka marka la dhameystiray qoraalka ka dib sida ku cad faqrada 10aad ee qodobka 44aad qofna laguma bedeli karo qofna laguma kordhin karo, waxaa ladoorbidaa joogitaan la'aantood, waana in la hubiyaa heybtooda qof ahaaneed.
4. Ku daritaanka iyo wax kabedelka dhinacyada doonaya in ku soo biiraan saxiixitaanka ka dib iyo marqaatiyadooda, laakiin intaa aanu nootaayuhu saxiixin ka hor, waa in lagu hirgeliyaa cadeyn gaar ahaaneed, erayada laguba kordhiyey ama waxaa laga bedelay qoraalka waana in saxiix cusub la saaraa.
5. Tirtirka iyo wax ku kordhinta iyo wax ka bedelka la sameeyay waxaa loo ogolaanayaa qaabka kor ku xusan.

**Qodobka 44aad**
***Luuqadda Qoraalka Nootaayadda***

1. Qoraalka nootaayada waa in lagu qoraa luqada soomaaliya ama carabi ama ingiriis hadba sida lagama maarmaanka yahay qoraalkana waa in uu noqdaa hadba sida uu u gaaro ka soo qeybgalaha ama turjumaha iyada oo ku dhameystirmayo rabitaanka dhinacyada.
2. Turjumaha waa in uu ahaadaa mid shuruudaha lagama maarmaanka ah leh si uu u noqdo marqaati ee ma ahaan karo mid laga soo dhex doortay marqaatiyada ama kuwa la aaminay, waana in la marsiiyaa dhaar nootaayaha hortiisa amaanada xafiiskiisa waxa uuna sameynayaa qoraalka la soo xusey.
3. Codsiga dhinacyada ee qoraalka asalka ah ama si hoose in uu uga soo qeyb galo turjumaha luuqada labada dhinac ay garanayaan si uu u tarjumo, waxa la turjumeyna waa in ay saxiixaan dhinacyada, turjumaha, marqaatiyaha, iyo nootaayada.

**Qodobka 45aad**
***Uqorista Warqadda Qof ka Naafadda ah***

1. Hadii dhinacyada midkood qeyb ahaan ama gebi ahaan aanu wax maqleynin markaa waa in uu aqriyaa qoraalka aan soo xusney.
2. Haddii uu yahay mid il la'a ee aan waxba aqrin karin waa in uu ka soo qeyb gala qof turjubaan ah oo ay soo magacaawday maxkamadda degmada, uu degan yahay qofka isha la'a lagana soo magacaabaa dadka isaga la tacaamala ee garanaaya qaabka wx loo fahamsiin karo sida calaamadaha iyo ishaaraadka uu wax ku fahmaayo.
3. Turjumaha waa in uu ahaado mid leh shuruudaha lagama maarmaanka leh si uu u noqdo marqaati waana in uu maraa dhaarta ku xusan faqarada 3aad ee qodobka 47aad waana in laga soo doortaa dadka qaraabadiisa ah, mar keliya isku noqon karo marqaati iyo mid la aamninay.

**Qodobka 46aad**
***Qaabka Warqad U Qorista Dadka Naafadda ah Uqurista***

1. Haddii dhinacyada midkood uu noqdo dhega la'a ama il la'a iyo, ka sokow ka soo qeyb qalka turjubaanka ee qodobka aan soo dhaafnay, waa in fiiro loo yeeshaa arrimaha soo socda:
    a. dhega laawe ama af laawe ee yaqaana wax qorid iyo wax aqris, waa in uu aqriyaa/go aanka ka hor inta aan la saxiixin, wixii uu aqriyay waa in uu ku ogolaadaa rabitaankiisa.
    b. haddii uusan aqoonin ama aan saxiix garaneyn, waxaa lagama maarmaan noqonaaya calaamadaha la midka ah, sido kale ka soo qeyb galka maarqaatiyada mid ka mid ah, ama ka soo qeyb galka turjubaann kale, keliya faqradaha ku qoran bilowga qodobkii hore.

**Qodobka 47aad**
***Burinta Qoraalka Nootaayada***

1. Qoraalka nootaayada waa wax Kama jiraan, keliya raadka uu lahaan haddii uu lahaan lahaa qoraal gaar ah, haddii ay saxiixaan dhinacyada xaaladaha soo socda:
    a. Hadii ay ka soo gaarto nootaayada ka hor inta aan la shaacin go'aanka magacaabidda ama ka hor inta aan la shaacin go'aanka hakinta, xitaa si ku meel gaar loogu joojiyo istecmaalka.
    b. Hadii ay ka soo gaarto nootaayaha jebinta qodobka 25aad ee faqrada 2aad sidoo kale jebinta nambarka 3aad ee qodobka 25aad isku darka baabi'inta go'aanka tilmaameyso isla lambarkaas.
    c. Hadii go'aanka eegidda ee qodobada 40,41,43,47,48,49 iyo lambarka 10aad ee qodobka 44aad.
    d. Hadii uu kamaqan yahay taariikhda uuna sheegayn cadeynta goobta ay ka soo gaartey.
    e. Hadii nootaayaha aanu laheen taariikhda la aqrin qoraalka dhinacyada, goobjoog marqaatiyada inta ka soo qeyb galeysa.

**Qodobka 48aad**
***Baabi'inta Cadeynta Qoraalka Nootaayaha***

1. Hadii uu jiro cadeynta baabi'inta qoraalka nootaayaha ee awooda garsoorka kama dambeysta ah ama gudoomiyaha golaha nootaayooyinka, kuna timid codsiga dhinaca daneynaaya gaarsiinta nuqul ku dhawaaqidda go'aanka, kaaliyaha awooda maxkamada ee ku dhawaaqday sugnaanshaha wax ka bedelka qoraalkii asalka

**Cutubka 9aad**
***DIIWAANKA NOOTAAYAHA***
***Qodobka 49aad***
***Ilaalinta Qoraalada Nootaayaha Iyo Diiwaanka Nootaayaha***

1. Nootaayada waa in uu meel aamin ah ku kaydiyaa dukumintiyada iyo wixii xiriir la leh.
    a) Qoraalka isaga soo gaarey waxaa ka reeban wixii sharciga uu qeexey ee ka reeban.
    b) Qoraalada aktiisa lagu keydiyey ee codsiga dhinacyada ka yimid ama go'aan sharci lagu keydiyey.

2. Waana in uu u habeeyaa qeyb qeyb sida ay u kala horeeyaan waqtigooda qoraal kasta waa in uu lambaro isku xiga lahaadaa, lifaaq kasta waxa uu yeelanayaa isla lambarada is xigxiga ee lagu lifaaqay xaraf ee ka soo ceysa.

3. Dardaaran guud ka hor inta uunsan dhiman dardaarmaha, dhawritaanka sirta dardaaranka ee qoraal ahaan loogu keydiyo nootaayaha ka hor inta aan la furin ama la faafin waa in uu ku hayaa gal gaar ah.

4. Dardaaranka guud ee dhimashada kadib marka uu geeriyoodo dardaarmaha codsiga qof kasta oo dan ka leh iyo kuwa kale furitaanka shaacinta ka dib, waa in uu u gudbaa galka iyo diiwaanka gaarka ahh ee qoraalka, rabitaankii u dambeeyey ee qoraalka nootaayada, kala horeynta dhacdooyinka dardaaran kasta waa in uu lahaadaa gal gooni ah oo leh taariikh iyo kala horeeyaan galka codsiga dardaaranka guud, furitaanka sirta dardaaranka iyo faafinta dardaaranka qoraal ahan.

***Qodobka 50aad***
***Dhawrista Qoraalada Nootaayadda***

1. Nootaayada cidna uma soo bandhigi karo asalka qoraalka ee aan ka aheen xaaladaha uu sheegayo qodobka 63aad kumana qasbana in ay iyaga soo bandhigaan ama iyaga lagu aamino marka laga reebo xaaladaha ama qaabka sharciga xadeynayo qoraalka.

2. Xaaldaha aan sharciga sheegin habka soo bandhigida iyo keydinta qoraalka nootaayada intaanu wareejin waa in uu nuqul sax ah ka sameeyaa oo lagu xaqiijiyo midka asalka ah oo lagu soo xareyn doono guddoomiyaha maxkamadda gobalka taasi waxaa lagu cadeeynayaa in nuqulka qoraalka lagu soo bandhigay laguna keydiyay.

3. Nootaayadu waa in uu dhigo halka laga qaaday nuqulka asalka ee qoraalka mid kale oo nuqul koobi ah ilaalinta laga soo celinayo hadii muhiim ay noqotana koobi ayuu siinayaa waana in ku dhameystirmaa habka qoraalka.

***Qodobka 51aad***
***La Noqosho Codsiga***

1. Qofka ku keydiyey nootaayaha dukuminti waxa uu xaq uleeyahay in uu codsigiisa dib uga noqsado, waxaana shardi u ah in ay ahaato mid u muuqata in ay sidaas u soconeyso danihiisa gaarka ah.

2. Waana in uu ku soo celiyaa habkii uu u sameeyey keydinta mid lamid ah, marka laga reebo marka uu dardaaranka uu ahaa mid ku xirnaa dukuminti ama qoraalo kale oo u baahan wax ka bedel.

3. Qoraalka keydka waa in uu nootaayada keydiyaa inta ay tahay diiwaanka waxa uuna qorayaa waxyaabaha lagu kordhiyey.

### *Qodobka 52aad*
### *Diiwaan-gelinta Heshiiska*

1. Nootaayada waa in uu ku ilaaliyaa qoraalka labo diiwaan mid uu ku qoraayo heshiiska dadka nool kaas oo ku shaqeeynaya wixii raad sharci ah ee canshuurta diiwaan-gelinta mida kale ee uu ku qorayo heshiiska ugu dambeeya waa in maalinle loo qoraa, iyada oo ayna laheen meelo banaan iyo xariijimo, tirooyin taxane ah, dhamaan rabitaanka ugu dambeeya ee ka soo gaara heshiisyada dadka nool sida ay u kala horeeyaan iyada oo ku tiirsan midkii qasadka ahaa, diiwaan gelint heshiiska dadka nool mid kasta waxa uu yeelanaya:-

    a) Lambarada xiriira.

    b) Taariikhda cadeynta heshiiska meesha ka soo gaartey.

    c) Nuxurka heshiiska.

    d) Heybta iyo dhinacyada iyo deegaanadooda.

    e) Calaamado kooban ee sheega ujeedada heshiiska, sheegidda qiimaha iyo sicirka ee xariirka la leh heshiiska nuxur ahaan xuquuq dhab ah, ka faaideysiga ma guurtada xaaladaha la midk ah.

    f) Diiwaan-gelinta iyo bixinta canshuurta heshiiska.

    g) Xushmada la siinayo nootaayaha.

    h) Fiiro siinta.

2. Diiwaan-gelinta heshiiska Kama dambeysta ah waxaa la qoraa oo keliya macluumaadka ku jira afarta ugu horeysa deegaanka.

3. Warqadaha diiwaanka waa in ay ahaadaan midka xariijimaha leh oo godad afar geesoole leh, nootaayahana waxaa ka reeban in uu ku qoro hal heshiiska wax kamid ah warqad kasta.

4. Lambarada isku xiga ee heshiiska iyo diiwaanka ee sheegaya qodobka 52aad waxa ay soconayaan in uu nootaayada hawshiisa ku gudanayo xaruntiisa, ka wareegida xarunta nootaayada waa in uu u sameeyaa lambareyn cusub.

5. nootaayada waa in uu saxiixaa warqad kasta ee diiwaanka uuna ku saxaa qeyb kasta oo kamid ah bandhig xarfo isku xiga ee haybta dhinacyada.

### *Qodobka 53aad*
### *Qaybinta Diiwaanka*

1. Diiwaanada waxaa u qeeybinaya nootaayada golaha nootaayooyinka, diiwaan kasta ka hor inta aan la istecmaalin, lambar lasiin, aanu saxiixin, warqad kasta gudoomiyaha golaha nootaayada boga hore waa in lagu cadeeyaa inta warqad uu ka kooban yahay qoraalka.

### *Qodobka 54aad*
### *Gudbinta Diiwaanka*

1. Nootaayada waa in uu gudbiyaa diiwaan hayaha nootaayaha gobolka, bil kasta nuqul ka mid ah in heshiis soo gaaray bisha lasoo dhaafay.
2. Nuqul kasta waa in uu ku saxiixnaadaa kuna daabacnaadaa diiwaankiisa.
3. Hadii aan nootaayaha soo gaarin bishaas wax heshiis ah waxa uu gudbinayaa caddeyn wax la'aan ah.

### *Qodobka 55aad*
### *Xiliyadda Gudbinayo Heshiis*

1. Xaaladaha uu nootaayaha gudbinayo heshiis sharci ah waa in ay goob joog ka noqdaan cidda awooda u leh heshiiskaas waana in loo furaa feyl cusub oo u gaar ah oo ka kooban bogag lambareysan saxiixana diiwaan hayaha nootayada gobolka, isla waqtigaas waa in la tilmaamaa heshiiska waxa uu la xiriiro waxaa ka reeban wareejin diiwaanka heshiisyada ku celiska ah.
2. Xaaladaas waa in fiiro loo yeeshaa tiirka tirsiga ee ka hor imanaya heshiiska iyo warqadaha dheeraadka ah ee qeyb ahaan la socda isla tirsiga awooda la soo bandhigi doono tirsiga waa in si lamid ah loogu soo bandhigaa tirsiga ugu dambeeya ee diiwaan geliyey maalinta soo bandhiga iyo soo celinta.

### *Qodobka 56aad*
### *Ilaalinta Tirsiga Diiwaanka*

1. Nootaayada tirsiga ka sokow waa in uu hayaa diiwaan ku qoran lambar texane ah kuna cad yihiin xaddiga iyo qiimaha maalinlaha ee loogu aaminey heshiiska lagu qorey hortiisa tilaabooyinka awooda garsoorka lamid ah.
2. Laga bilaabo taariikhda heshiiska la gaarsiiyey ku wareejinta danlayaasha, qarashka iyo qiimaha aan soo sheegney.

3. nootaayada waa in uu qoraa qeyb kasta kadib markii la hergeliyo hawsha ay dhameystiranto gudashada hawsha la soo gaarsiiyey.

4. Diiwaan gelinta golaha nootaayooyinka waa in uu ahaadaa mid lambareysan saxiixan, yeelataana qaabka uu yahay heshiiska.

5. Diiwaan gelinta lama xariirto amaanada nootaayada ee loogu tala galey bixinta canshuurta heshiiska.

***Qodobka 57aad***
***Keydinta Diiwaanka***

1. Nootaayada waa in laga helaa aktiisa qoraalka heshiiska inta ay socoto hawsha nootaayada isaga oo keliya ayaa xaq u leh baaritaanka iyo aqrinta, siinta nuqulka, nuxurka iyo cadeynta heshiiska qoraalka ee soo gaartay, ama lagu keydiyey.

2. Umana baahna amar qaadasho hubinta iyo aqrinta nuqul siinta heshiiska ugu dambeeyey, siinta nuqulka iyo cadeeymaha inta uu noolyahay dardaarmaha, haduusan darrdaarmaha la mid noqon qof leh ama gaar ah ee qaab ahaan lamid ah.

***Qodobka 58aad***
***Wax Ka Badalidda Warqadda Asalkaa ah***

1. Go'aanka qodobka 46aad ee qaabka loo soo qoraayo warqada asalka iyo wax ka bedelidiisa wax ku kordhin ama wax ka dhimid xitaa waxaa lagu dabaqi karaa nuqulka nuxurka ama cadeymaha isbedelada laakiin wax ku kordhinta asalka qaabka uu sheegayo qodobka waxa uu ku dhameystirmayaa dhil ahaan ee ma aha qalad daraf ka raacin.

***Qodobka 59aad***
***Warqadda Wakaalada***

1. Nootaayada waa in uu ku qoraa dhamaadka nuqulka ogolaasha wakiilada dhamaan waxyaalaha la socda nuqulka asalka wixii aan ka aheen tan hada ugu dambeeysa ee weydiisanaya nuqulka tanaasulidda xaaladaas, nootaayaha waa in uu ku sameeyaa nuqulka ka tanaasulidda iyada oo ku xusan taariikhda iyo daabacadda waxaa raacsan ee aan nuqul aheen.

2. Nuqulka daabacaada iyo cadeymaha waa in ay lahaataa ugu dambeyn taariikhda ogolaanshaha waana in ay lamid noqotaa nootaayada ee la socda nootaayada saxiixa shaabada iyo cadeynta nuqul lamid ah midka asalka hadii nuqulka iyo cadeynta ka koban yihiin waraaqo fara badan, warqad kastaa waa in la saxiixaa nootaayah oo dhinac ka ah.

3. Ka sokow qaabkaas nootaayada waa in uu ogeysiiyaa nuqulada la siiyey hadii ay soo baxaan dhibaatooyin kale oo sharci.

**Cutubka 10aad**

*SOO-SAARIDA QORALADA*

***Qodobka 60aad***

***Qoraaladda La Soo Saaray***

1. Marka laga reebo xaaladaha sharciga tilmaamey nootaayada waxa uu soo saari karaa dhinacyada keliya qoraalada ku saabsan, wakillo ama heshiisyo ku saabsan sugitaan ama qoraalada muhiimka u ah fulinta halhowle kaliya, ama wakiilada isticmaalka xaqa doorashada xaaladaha gaarka ee sharciga iyo siyaasada iyo maamulka tilmaamayo.
2. Iyada oo si cad u qeexaya nuqulka qoraalada lambar 1,4,5,6,7 iyo qodobka 1aad iyo qoraalada sugitaanka ee qodobada 40 iyo 65.

***Qodobka 61aad***

***Habka Gudbinta Qoraaladda***

1. Nootaayada nuxurka qoraalka ku gudbin karaa email ama taleefoon.
2. Hadii koobitaanka qoraalka xadeeysan yahay waxaa dhameeystiraaya nootaayada isaga oo ka diyaarinaya qoraal gaar ah iyada oo dhinacyada joogaan.
3. Koobitaanka aan sare ku soo xusney ee emailka waa in lagu qoraa diiwaan gaar ah ee nootaayada leeyahay kaas oo lagu sameeynayo calaamad xaraf ah lambarka diiwaanka ee qoraalka iyada oo la raacinayo saxiixa tiimbaraha.
4. Qoraalka telegaraamka waxa uu keedsananayaa xafiiska telegaraamyada, halkaas ayuu ku keedsanaanayaa muddo 1sano kadib keedka nootaayada gobolka hadii soo gudbinta uu yahay taleefon ahaan, markaa waa in lagu sameeyaa 2 nootaayo oo kala duwan, shaqsi ahaantooda iyo sida ay u kala horeeyaan waana in lagu qoraa shaqsiyadooda, ujeedada isgaarsiinta ee xafiiska isgaarsiinta.
5. nootaayada waxa uu u turjumayaa isgaarsiinta qoraala ahaan isaga oo ilaalinyo kala horeynta gudbinta.
6. Qoraalka waxa uu ahaanayaa mid yaala nootaayaha aktiisa waxaana ka sameen Kara nuqulo.
7. Isgaarsiinta telegaramka iyo talefonka, sida kor ku tilmaaman waxaa loo qaadanayaa in uu la mid yahay qoraalka asalka ah inta laga helaayo cadeyn burisa.

### *Qodobka 62aad*
### *Habka Saxiixa Waraaqaha*

1. Sugitaanka saxiixa la saaro halka ugu damneeyso qoraalka gaar iyo lifaaqyada waraaqaha dhaxdooda ah ee iyaguna saxiixan waa in ay ahaataa cadeynta iyo saxiixyada mid raacsiisan saxiixa nootaayada, marka la cadeeyo marqaatiyada, kuwa la aaminey, taariikhda iyo meesha lagu sameeyey.

2. Marka la saxiixo darafyada iyo warqadaha dhexe waxa uu ku dhameestirmayaa in lagu dhameeystiro saxiixa nootaayada.

3. Qoraalka gaarka ee uu sugey nootaayada, waxa uu ahaanayaa mid sax ah hadii aaney ka imaanin dhinacyada wax lidkeeda ah, waxa uu noqonayaa sidiisa xaalad kasta, laakiin waa in marka hore ay ahaataa ilaalinta nootaayada la diiwaan geliyey waqtiga uu sharcigu sheegayo, iyo canshuurta diiwaan gelinta.

## Cutubka 11aad
## *XUQUUQDA NOOTAYADA*
### Qodobka 63aad.
### *Xuquuqda Nootaayaha*

1. Nootaayhaa waxa uu xuquuq ku leeyahay qoraal kasta, nuqul, nuxurka, ama cadeynta iyo hawl kasta ee ku saabsan meheradiisa, in ay ahaato dhexdhaxaad dhinacyada kale, marka lagu daro kharashka xuquuqda dheeraadka ah.
2. Tariifada xushmada iyo xuquuqaha iyo cabirka Kharashka celinta waxaa lagu xadidayaa go’aanka Wasiirka Garsoorka, kadib markii uu dhageeysto golaha nootaayooyinka.
3. Xushmada iyo xuquuqda dheeriga ah ee ku sugnaaday hawsha nootaayada waa mid gaar ah.

### Qodobka 64aad
### *Xushmada Nootaayaha*

1. Haddii qoraalku ka koobanyahay heshiis kala duwan, wax ay xushmaddu noqonaysaa inta heshiisyada ay la’egyihiin.

2. Haddii qoraalku ka koobanyahay go’aanno farabadan, waxa ay yeelanaysaa xushmado kala duwan, hadba inta uu la’egyahay heshiiska lakala galay, dabeecadda midkasta.waxaa mudnaanta lasiinayaa sidii xushmadda u noqon lahayd in meel la’iskuugu keeno kuna jirto danta nootaayada, haddii aan dheeraad Ku noqonnin dhinaca kale.

***Qodobka 65aad***
***Bixinta Magdhowdda***

1. Haddii qoraalka lagu baabi'yay eedayn nootaayaha darted, nuqulka, nuxurka ama caddaynta ee uu usameeyey qaab aan la'aamini Karin oo keenaya nidaam darro, ma waajibayso xushmadaha qaarkood xuquuq iyo canshuur celin. Xaaladahaas oo lagu daray magdhow khasaaraha uu sharciga tilmaamay, nootaayada waa 'inuu usoo celiyaa dhinacyada kharajka ay bixiyaan.

***Qodobka 66aad***
***Kharash Celin***

1. Waxaa kareebban xaaladaha uu sheegayo qodobka 27aad ee ku saabsan dadka laga dhaafay badbaadin dhinacyada waxa ay ka qaadan karaan iyada oo cadaan ah nootaayaha lacagta xushmada iyo Kharashka canshuurta.
2. Nootaayada waa ka diiidi karaa qof kasta oo waydiista diritaanka nuqulka, nuxurka iyo cadeynta inta laga cadeynayo lacagta ma canshuurta sida ay u kala horeeyaan guddi ahaan ama hadii ay jiraan dood ama khilaaf loo gudbiyey golaha nootaayooyinka.

**Cutubka 12aad**
***GOLAHA NOOTAAYOOYINKA***
***Qodobka 67aad***
***Xubnaha Golaha Nootaayooyinka***

1. Golaha nootaayooyinka waxa ay xaruun ku leeyihiin dhusamareb gaar ahaan maxkamada rafcaanak. Waxa ayna ka kooban yihiin:-
    a) Guddomiyaha Maxkamada rafcaanka ee dhusamareb "Guddoomiye".
    b) Garyaqaan ka tirsan xafiiska ilaalinta kaas oo sanadle usoo magacaabaya xeer ilaaliyaha gobolka galgaduud.
    c) Nootaaye shaqeeya oo sanadle usoo magacaaba wasiirka garsoorka.
2. Hawsha waxaa ka shaqeeynaya kaaliyaha sare maxkamada rafcaanka.

***Qodobka 68aad***
***Awoodaha Golaha Nootaayooyinka***

1. Golaha nootaayooyinka marka lagu daro awoodda kale ee sharciga siinayo waxa ay awood uleeyihiin:
    a. Kormeerka kaydka hawlaha iyo asluubta nootaayada iyo gudahashada hawshooda sida saxda ah.

b. Kormeeraka asluubta tababartayaasha iyo qaabka ay u gudanayaan waajibaadkooda shaqo.

c. Kormeerka habsami u socodka hawlaha kaydka nootaayada gobolka.

d. Soo bixinta, codsi kasta cidda awoodda u leh, soo bandhiggiddooda.

e. Qaabeynta iyo cusboonaysiinta tababarka nootaayanimada, kuwa dhamaystay iyo tababartayaasha cusub.

f. Codsiga waxa ay ka bilaabanaysaa xallinta is qabad nootaayooyinka iyo nootaayaasha iyo cid saddaxaad, shahaado, soocelinta waraaqaha, ha noqoto kharajka ama xushmada ama ujeeddo ama wax kasta oo xiriir la leh hawsh nootaayaha.

***Qodobka 69aad***
***Xilalka Golaha Nootaayooyinka***

1. Xilalka Golaha Nootaayooyinka Waxa ay Ku Gaaraan Aqlabiyadda codka.
2. Xoghayaha waa in uu ururiyaa qoraalada kulamada, waana in uu kaydiyaa dhamaan warqadaha la xiriira mawduuca, Guddoomiyaha golaha ayaa awood u leh in uu soo saaro nuqul qoraalada kulamada waxaana saxiixaya Gudoomiyaha iyo Xoghayaha.

***Qodobka 70aad***
***Anshax Marinta Hawlaha Nootaayooyinka***

1. Golaha Nootaayooyinka hawlahaas ka sokow, waxa ay kaloo awood u leeyihiin hab raac anshax marinta hawlaha Nootaayooyinka.
2. Goluhu waxa uu awood u leeyahay in ay dabaqaan Qodobada ilaalinta, faafreebka iyo Tacsiirka.

**Cutubka 13aad**
*DIIWAANKA GOBALKA EE NOOTAAYADA*
***Qodobka 71aad***
***Diiwaanka Nootaayaha ee Gobolka***

1. Maxkamada rafcaanka gobal kasta waxa ay asaas u tahay diiwaanka nootaayooyinka ee gobolka.
2. Keydiyaha diiwaanaka nootaayooyinka gobalka iyo kaaliyaha sare ee Maxkamada rafcaanka gobalka.

***Qodobka 72aad***
***Kaydinta Diiwaanka Nootaayaha Gobolka***

1. Diiwaanka nootaayooyinka gobalka waxaa lagu kaydinayaa laguna xanaanaynayaa:
    a. Qoraalada iyo diiwaanada nootaayooyinka geeriyooday qayb ahaan ama kuwa si joogto ah ama si kumeel gaar ah looga fariisiyey hawsha nootaayaha ama u wareejiyey xaruntiisa Gobal kale.
    b. Nuqulada laga baabi'iyey diiwaanka sida uu sheegayo Qodobka 56aad.
    c. Telagaraamyada la helay ama qoraalka laga sameeyey Telefoonada lasoo diray sida u sheegayo Qodobka 63aad.
2. Keydiyaha waxa uu mas,uul ka yahay Xanaaneynta iyo keydinta dhamaan dukumiintiyada lagu keeydiyey diiwaanka waa in uu si hagaagsan u ilaaliyaa dhab u gudashada mas.uuliyada nootaayooyinka ka saaran diiwaanka iyo in ay cadeeyan golaha nootaayooyinka Jebinta gobaladooda Nootaayayaasha Mar labaad.

***Qodobka 73aad***
***Diritaanka Iyo Xaqiijin Diiwaanka Nootaayaha Gobolka***

1. Marka ay socoto kaydinta qoraalka asalka iyo diiwaanka kaydiyaha isla markiiba waxa ay bilaabayaan diritaanka iyo xaqiijin hawshaas iyada ah, kaydiyaha waxa uu diyaarinayaa warbixin gaar ah , Nuqul ka mid ah waxa uu u gudbinayaa golaha nootaayooyinka .

***Qodobka 74aad***
***Fulinta Hawsha Nootaayaha***

1. Kaydiyaha waxa uu sameynayaa hubinta qoraalka ku kaydsan diiwaanka nootaayaha Gobolka.
2. Soo saarida nuqul, xitaa qaabka fulinta, Nuxurka iyo Cadeyta.
3. Kaydiyaha waxa uu kaloo qaban-karaa soo celinta dukumiintiyada furitaanka iyo faafinta dardaaranka ku kaydsan Diiwaanka isaga oo raacaya shuruudaha ku saabsan mawduuca.
4. Qodobada la xiriira qaabka qoraalka nootaayaha waa in ay fiiriyaan kaydiyaha Habka gudashada hawlaha nootaayaha.
5. Fulinta hawsha nootaayaha waxa uu hoos imaanayaa kaydiyaha sida la xisaabtanka waajib gudasho la'aanta nootaayooyinka nusqaaminta xushmadda iyo xuquuqaha kale ee dheeraadka ah.

***Qodobka 75aad***
***Tix Raaca Diiwaanka Nootaayadda***

1. Diiwaan nootaayo goboleed kasta waxa uu yeelanayaa labo xaraf oo leh kala horaynta xuruufaha shibanayaasha, mid waxaa iskaleh nootaayaha kuna tilmaaman haybta

nootaayooyinka keydiyey qoraalada , taariikhda u horeeysa iyo midka ugu dameysay ee qoraalka.

2. Waxaa kaloo lagu cadeynayaa haybta dhinacyada ay khuseyso qoraalka, marka hore waa in si taxan loo tilmaamaa qoraalka ilaalinta nootaayo kasta, mida labaad waxa ay ahaanaysaa mida lagu sheego nooca iyo tariikhda qoraalka iyo magaca nootaayaha qoray.

## Cutubka 14aad

*KORMEERKA NOOTAYADA*

***Qodobka 76aad***

***Kormeerka Nootaayaha***

1. Wasiirka Garsoorka waxa uu leeyahay isticmaalka awooda sare ee kormeer ee nootaayooyinka iyo diiwaanka nootaayooyinka gobalka iyo kormeerida waqtiga ku habboon.
2. Isla kormeer kaa lamid ah waxaa sameyn kara golaha nootaayooyinka iyo xeer ilaaliyaha gobalka galgaduud.

***Qodobka 77aad***

***Hubinta Qodobo Ciqaabeed ka***

1. Hubinta lagu sheegay qodobka kore waxaa sameynkara gudoomiyaha golaha nootaayooyinka ama cida uu u wakiisho.
2. Hubinta waxaa lagu sameynayaa qoraal taas oo noqul ka mid ah isla markiiba loo gudbinayo wasiirka garsoorka.

***Qodobka 78aad***

***Hab Ciqaabeed ka Nootaayooyinka***

1. Qodobada Ciqaabeed ee nootaayooyinka gabay waajibaadkooda shaqo waa:
    a. Digniin
    b. Cabasho
    c. Ganaax
    d. Laalid
    e. Casilaad
2. Qodobadan waxaa loo dabaqayaa si madax banaa gaar ahaan kuwa sharcigu soo rogay xitaa hadii uu ka dhalanayo baabi’inta qoraalka.

***Qodobka 79aad***

***Ganaaxa Nootaayooyinka***

1. Amarka ka kooban canaanta nootaayada ku wareejin dhaawac leh si aan markale uusan u dhicin.
2. Faafreebka cadeynta kusoo baxaa qaab dhaliilan ee wareejin la’aanta iyo nuqul la xiriira talaabo ka baaqasho ogaysiin 15 maalin gudohood lagu soo xareeyo diiwaanka

nootaayada gobalka. Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan 40$ 100$ nootaayada jabiya axkaamta ku xusan Nambarada 1,2,3,4,5 ,7 iyo 9 ee qodobada 44aad iyo 46, 57,63, 65 iyo kaydinta qoraalada iyo ku xadgudubka muga tirsiga ee axkaamta ku xusan qodobka 52aad iyo 55aad .

3. Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan 100$ 250$ nootaayada ku xadgudba axkaamta ku xusan Qodobka 22aad Numberada kala ah 1,8,10,11iyo 12 ee Qodobka.44aad iyo bilawga faqrada Qodobka 6aad .
4. Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo gaaraya 250$ ilaa iyo 500$ Nootaayaha marka laga laalay ama laga joojiyey soo saarista nuqulka, cadeynta ama nuxurka .

### *Qodobka 80aad*
### *Laalidda Hawlaha Nootaayooyinka*

1. Waxaa lagu ciqaabayaa in laga laalo hal bil ilaa sadex bilood nootaayada:
   1) Horay ugu xadgubay qodobka 22aad .
   2) Ku xadgudubka axkaamta ku qoran qodobka 47aad 48aad 49aad .
   3) Taxadar la'aan ku kaydin waayay qoraal lasoo gaarsiiyey ee agtiisa lagu keydiyey.
   4) Mar labaad ku xadgudub xaalad uu sheegayo Lambarada 1,8,10,11iyo 12 ee
   5) Ka hor yimaada hubinta lagu sheegay qodobka 79aad kaas oo horjeed-keeda wax aan suura gal ahayn.
2. Waxaa lagu ciqaabayaa in la laalo sadex bilood ilaa sagaal bilood nootaayada ku xadgudba axkaamta faqrada 1aad ee Qodobka 24aad iyo Qodobka 25aad, 40aad, 41aad iyo 42aad.
3. Laalitaanka waxa uu ka dhalanayaa dhicitaanka uu soo saaro xubin taya leh oo ka tirsan golaha nootaayooyinka.

### *Qodobka 81aad*
### *Amarka Ciqaabta Nootaayaha*

1. Karti darada qaanuuneed ee hawl gudashao la'aanta nootaayada lid keed waxaa laga soo saarayaa amar xiritaan ama amar xabisaad. Waxaa kale oo ay noqon kartaa ku dhawaaqida hawl gudasho la'aanta nootaayada kaas oo keeni karta in uu ka dhasho fal ciqaabeed ee dambiyada uu tilmaamayo faqrada ugu dameysay ee Qodobka 86aad.
2. Awooda garsoor ee falkaas ku qaadi karta nootaayaha waxa ay ku wargalinayaan golaha nootaayooyinka khasaaraha nootaayaha ee dambigu ka dhashay.

### *Qodobka 82aad*
### *Ku Qasbid Iscasilaad*

1. Waxaa lagu ciqaabayaa casilaad nootaayaha:
   a. Hawsha iska wata marka la laalay ama karti daro looga fariisiyey hawsha, waxaana ka reeban axkaamta farqrada ugu dameysa Qodobka 83aad.

b. U kabasho goobtiisa shaqo, ka reebtoon cudur faafa ama cudur lakala qaado darteed.
c. Hadii uu si ula kac aanu u xafidin diiwaanka iyo qoraalka lasoo gaarsiiyey in uu keydiyo awgeed. Hadii uu soo gaaro xukun xatooyo xoola dadweyne, laaluush waydiisasho, laaluush qaadasho, been abuur, xatooyo, dhagar, qaan, gudasho, ama go,aanada gaarka ee awooda Booliska.

**Qodobka 83aad**
***Dabbaqidda Axkaam Kala Gedisan***

1. Marka laga reebo axkaam kala gedisan ee nootaayaha dabbaqaayo marka la fiiriyo diiwaanka kale ee sharciga farayo haynteeda, sida oo kale ciqaabta laga digayo marka qaabdarada iyo tiris la,aanta.

**Qodobka 84aad**
***Qifiifinta Ciqaabta***

1. Hadii nootaayaha uu noqdo mid lagu soo eedeeyey ka qeyb qaadasho sifaalaha dibga fududeeya laalitaanka iyo ku dhawaaqida ciqaabta waxa ay ahaan kartaa mid laga qafiifiyo ugu yaraan nus.
2. Waxa uuna noqon karaa mid loogu bedelo laalitaanka iyo digniinta.

**Qodobka 85aad**
***Ciqaabta Ku Noq-Noqoshada***

1. Ku noq-noqoshada mar kasta ah xad gudubka cusub waxa uu u noqon doonaa ciqaab shan sanadood ah ee xukunkii hore.

***Qodobka 86aad***
***Ciqaabta Qalad Ku Wareejinta Nootaayadda***

1. Tilaabada ciqaabeed ee lidka ku ah Nootaayooyinka, qalad ku wareejintooda waxa uu noqon-doonaa seddex sanadood laga bilaabo maalinta xadgudubka, iyada oo ay jirto tilabooyin la qaadayo.

***Qodobka 87aad***
***Anshax Darada Nootaayaha***

1. Nootaayaha qaab kasta oo sharaf darro ee ku timaada asluubtiisa gaarka ah iyo midka guud, sharaftiisa, sumcadiisa, xushmadiisa iyo haybada dabaqada nootaayooyinka, ama naaqus xushmadda iyo xuquuq dheeraad ah u sameyn saaxiibadiisa tartan sharci daro ah, waxaa lagu ciqaabayaa edbin iyo laalitaan ilaa hal sano ah, haddii xaalada aad u qatar tahay waxa ay keenaysaa casilaad, casilaada waxa uu mar kasta ahaanayaa mid lagu

dabaqo nootaayaha, marka uu noqdo mid lagu xukumay laalitaan laba jeer ku xad gudub axkaamta ku xusan qodobkan, ku xadgudub hor-leh.

**Cutubka 15aad**

***Qodobka 88aad***

***Fal Ciqaabeedka Nootaayaha***

1. Gudoomiyaha golaha nootaayooyinka waxaa soo gaaray akhbaar sheegaysa ku lug lahaansho nootaanyo fal dabaqaada ciqaabta nidaamisa iyada oo ka horeysa xaqiijinta lagama maarmaanka ah ee nootaanyaha khuseeya in loo soo gudbiyo golaha nootaayooyinka kaas oo go`aan ka gaaraya in la raaco hab ciqaabeedka nootaayaha.

2. Sida ay noqotaba golaha waxa ay cayimayaan in tilaabo laga qaado gudoomiyaha waxa uu siinayaa warqad ogaysiin oo deg deg ah nootaayaha kana kooban arimahaan.

3. Muddo 20 maalmood gudohoood laga bilaabo maalinta la gaarsiiyay warqadda ee ku xusan faqrada kore, nootaayaha waxa uu ku keeni karaa caddeymihiisa waxa uu ka qabo arinta si qoraal ah.

4. Waqtiga kor ku xusan waa in lagu dhameystiraa wax yaabaha loo baahan yahay iyo baaritaanka loo baahan yahay in ay golaha ka dhagaystaan nootaayaha haddii codsi uu soo sameeyay.

***Qodobka 89aad***

***Saamixidda Golaha Nootaayooyinka***

1. Golaha nootaayooyinka Kama saamixi karo nootaayaha la soo eedeeyay in uu saaro ciqaabta uu u arkaayo munaasabka haddii ay awoodiisu tahay, haddii kale waxa uu u gudbinayaa wasiirka garsoorka.

2. Haddii ciqaabta uu saarayo u arko in ay awoodiisa tahay golaha nootaayooyinka uma gudbinaayo wasiirka garsoorka wax-sabab ah, waxaa si ku meel gaar ah loogu gudbinayaa dhamaan nuqulada la xiriira hab raaca ciqaabta.

3. Wasiirka waxa uu dib u eegis ku samayn karaa go`aanka isaga oo aan ku koobnaanayn soo jeedinta golaha haddii ay ku saabsantay qadarka iyo tirada ciqaabta. Nuqulka go`aanka wasiirka waxaa loo gudbinayaa nootaayaha iyo golaha nootaayooyinka.

***Qodobka 90aad***

***Go,aanada Ciqabeed ee Golaha Nootaayooyinka***

1. Go,aanada maamul iyo ciqabeed ee ku saabsan go,aanka Kama danbaysta ah ee nootaayaha waxauu rafcaan u qadan karaa maxkamada sare wixii sharciga waafaqsan mudo soddon malmood ah marka go,aanka la soo gaarsiyo.

***Qodobka 91aad***
***Baabi'in***

1. Diiwaanka nootaayada ee sheegaya qodobka 110aad ee nidaamka garsoorka ee haatan jira waa la baabi,yay.

2. Keydiyaha diiwaanka qoralada lagu wareejiyay iyo waraaqaha waa in lagu keydiyaa diiwaanka nootaayaha gobalada Galgaduud/ Mudug 31 ka December ee sanad walba.

***Qodobka 92aad***
***Kharashka***

1. Kharashka la xariira hawsha golaha nootaayooyinka ee keydka nootaayaha gobalka waxa ay fuuleysaa wasarada cadaallada iyo garsoorka (DGGM)

***Qodobka 93aad***
***Xeer Nidaaminta***

1. Xeer nidaaminta ku saabsan nootaayaha keydka nootaayooyinka waxaa awood u leh oo kaliya wasiirka cadaallada iyo garsoorka (DGGM)

***Qodobka 94aad***
***Dhaqan-gal***

1. Qodobadaan waxa ay ka dhaqan gelayaan dhamaan dhulka DGGM 15 maalmood gudahood ah kadib marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirada, Golaha Baarlamanka, Madaxweynaha DGGM uu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ee DGGM.